

AOC-491 Doc. Code: EGP  
Rev. 8-16  
Bogga 1 ee 2  
Commonwealth of Kentucky  
Maxkamadda Cadaaladda  
[www.courts.ky.gov](http://www.courts.ky.gov)  
RCr 8.08, 8.10; KRS 17.169; 17.170;  
532.050(1)



**MOTION TO  
ENTER  
GUILTY PLEA**

**MOOSHINKA  
GALIDDA  
DAMBI  
QIRASHADA**

Lam. Kiiska \_\_\_\_\_  
Maxkamadda \_\_\_\_\_  
Degmada \_\_\_\_\_  
Waaxda \_\_\_\_\_

COMMONWEALTH OF KENTUCKY

DACWOODAHA

VS.

EEDAYSANAHA

Yimaada eedayanaha, shakhsi ahaan iyo gargaar qareenba leh, oo si xushmad leh ugu gudba Maxkamaddan si ay ugu oggolaato in uu ka noqdo/ay ka noqoto dacwadiisii hore ee **"DANBI DIIDID"** oo ugu gudbo **"DANBI QIRASHO"** sida hoos ku cad. Isagoo taageeraya mooshinkan, Eedeysanaha wuxuu yiri sidan soo socota:

1. Magacayga oo dhamaystirani waa \_\_\_\_\_  
Waxaan ahay isla qofka lagu magacaabay dacwada.
2. Garaadkayga hadda ma saameynayaan mukhaadaraad, khamri ama daawo.
3. Waxaan dib u eegay nuqulka dacwadda waxaan u sheegay qareenkayga dhammaan xaqiiqooyinka aan ogahay ee la xiriira eedaymahayga. Waxaan rumaysanahay in isaga/iyadu si buuxda uga warqabo kiiskayga. Si dhameystiran ayaanu uga wada hadalnay, waxaan fahmay, ee deymaha iyo wixii iska difaacid ah ee suurtagal ah.
4. **Waxaan fahamsanahay inaan sameyn karo "DANBI DIIDID" ama "DANBI QIRASHO" wax kasta oo la igu soo oogay.**
5. **Waxa kale oo aan fahamsanahay in Dastuurku ii dammaanad qaadayo xuquuqahan soo socda:**
  - (a) **Xaqa inaan isku marag furin;**
  - (b) **Xaqa dacwad degdeg ah oo dadwayne oo xeerbeegti leh oo ay aniga igu meteli doonaan qareen iyadoo Commonwealth ay tahay inay si waadax ah u caddeeyaan dembigayga;**
  - (c) **Xaqa in aan hortago oo aan su'aalo weydiiyo dhamaan marqaatiyaasha loogu yeedhay inay igu marag furaan;**
  - (d) **Xaqa aan u leeyahay in aan keeno caddeyn kasta, oo ay ku jiraan keenista marqaatiyada, ee dantu iigu jirto;**
  - (e) **Xaqa aan u leeyahay in aan rafcaan uga qaato kiiskayga maxkamad sare.****Waxaan fahamsanahay in haddii aan "DANBI QIRTO," aan ka tanaasulayo xuquuqahan.**
6. Waxaan fahamsanahay in haddii aan **"DANBI QIRTO"**, in Maxkamaddu ay soorog karti cigaab kasta oo sharcigujideeyay. iyo inkasta oo ay tixgelin karto tallada Commonwealth, ay Maxkamaddu diidi karto. Xaddiga cigaabta sharciga ah waxa lagu dejiyey lifaaqa "Commonwealth's Offer on a Plea of Guilty (AOC-491.1)" kaas oo aan dib u eegay oo saxeexay.
7. Waxaan fahamsanahay in haddii ay Maxkamaddu diido heshiiska qiraalka, waa inay sidaas igu soo wargelisaa. Haddi ay tani dhacdo, waxa laga yaabaa in aan ku sii adkaysto qiraalkayga dambiga oo waxa suurtagal ah in aan helo cigaab ka adag tii aan ku gorgortamayey ama waxa laga yaabaa in aan ka noqdo qirashada dambiga oo aan u gudbo dacwad maxkamadeed. Waxaan sidoo kale fahamsanahay in Maxkamaddu aysan ku xukumi doonin xukun dembi culus ah, oo aan ka ahayn dembiga dilka ah, iyada oo aan marka hore amar ku bixinin sameynta baarista xukunka kahor. Maxkamaddu waxay tixgalin doontaa warbixinta qoraalka ah ee baarista kahor xukunka kahor inta aysan ii sheegin inay aqbali doonto heshiiska qiraalka iyo in kale.
8. Baddelka qirashada dembigayga, Commonwealth waxay oggolaatay inay u soo jeediso Maxkamadda xukun(ka/ada) lagu sheegay lifaaqa "Commonwealth's Offer on a Plea of Guilty.." Marka laga reebo talladaas, ma jiro qof, oo uu ku jiro qareenkaygu, oo ii ballan qaaday dheef kale oo aan ku beddelanayo qirashada dembiga, mana jirto cid igu qasabtay ama iigu hanjabtay in aan **"DANBI QIRTO."**
9. Maadaama aan ahay **DANBIILE**, oo aanan sheegan dambi la'aan, waxaan jeclaan lahaa inaan **"DANBI QIRTO"** anigoo ku tiirsan lifaaqa "Commonwealth's Offer on a Plea of Guilty."

10. Waxaan cadeynayaa in **"DAMBI QIRASHADAYDU"** ay tahay mid si xor ah, ogaal leh, xilkasnimo iyo ikhtiyaari ah loo sameeyay, in uu i metelayay qareen, in qareenkaygu uu si buuxda iigu sharaxay xuquuqdayda dastuuriga ah, iyo sidoo kale eedeymaha la igu soo oogay iyo wixii difaac u ah iyaga; iyo in aan fahmay nooca dacwadda iyo dham=maan arrimaha ku jira dukumeentigan
11. Waxaan fahamsanahay in haddii la igu xukumo dembi la xiriira methamphetamine ama dembi la xiriira anhydrous ammonia sida ku cad KRS cutubka 218A, 250 ama 514, ay sharci daro ii noqon doonto inaan haysto ephedrine, pseudoephedrine, phenylpropanolamine, cusbadooda ama optical isomers, ama cusbada optical isomers ilaa shan sanno kadib xukunkayga, ka sii daynta xabsiga ama ka sii daynta xabsiga dhex jooga bulshada, ka sii daynta xabsiga ee degdega ah, sii daynta damaanada ah, ama sii dayn kale oo shuruudaysan, hadba kii danbeeya. KRS 218A.1446.
12. Waxaan fahamsanahay in xukunka lagu xukumo heer kasta oo kufsi, galmo qaababka kale ah, xadgudub galmo, ama daba gal ah uu u shaqeyn doono codsi ahaan amarka ilaalinta dadka dhexdooda ee lagu soo saaray cutubka KRS 456 oo ay keeni karto in amarkaas la soo saaro.
13. Waxaan fahamsanahay in haddii la igu xukumo **dembi culus** sida ku cad Xeerarka Dib loo eegay ee Kentucky, muunad DNA-gayga ah ayay soo qaadi doonaan shaqaale idman sida waafaqsan KRS 17.170.
14. Waxaan fahamsanahay in eedeymaha laygu xukumay maanta ay u qalmi karaan in diiwaankooda la tirtiro si waafaqsan cutubka 431 ee KRS.
15. Waxaan fahamsanahay in xukunkayga halkan maanta la igu xukumay awgeed, **laga yaabo in la igu qaado ganaaxyo waawweyn/la kordhiyay haddii la igu helo iyo/ama la igu xukumo dambiyo mustaqbalka.** Waxaan fahamsanahay in haddii aanan ahayn muwaadin Maraykan ah, laga yaabo in la i musaafuriyo iyada oo la raacayo shuruucda iyo xeerarka xukuma Adeegga Socdaalka iyo Jinsiyadaha ee Maraykanka. Waxaan fahamsanahay shuruudaha qiraalkan oo dhamaystiran iyo dhamaan waajibaadka ay igu soo rogtay shuruudaheeda.

Waxa lagu saxeexay maxkamad furan iyadoo uu joogo qareenkayga \_\_\_\_\_ maalintan \_\_\_\_\_, 2 \_\_\_\_.

\_\_\_\_\_  
**Saxeexa eedaysanaha**

### SHAHAADADA QAREENKA

1. Inta aan ogahay iyo sida aan rumeysanay, eedaysanuhu waxa uu fahmay eedaymaha ku jira dacwada iyo/ ama wax beddelka kasta oo lagu sameeyay. Waxaan si buuxda ugala hadlay eedaysanaha eedaha iyo wixii difaac ah ee suurtoagal ah, waxaan aaminsanahay inuu isaga/iyada si buuxda u fahmay eedaymaha iyo difaacyada suurtoogalka ah. Waxaan dib ula eegay eedaysanaha lifaaqa "Commonwealth's Offer on a Plea of Guilty" iyo gudbinta "Mooshinta Gelidda Dembi Qirashada" waxaan aaminsanahay in isagu/iyadu fahmay dukumentiyadan.
2. Inta aan ogahay iyo sida aan aaminsanahay, **"DAMBI QIRASHADA"** waxa loo sameeyay si xor, ogaanshiyo, xilkasnimo iyo ikhtiyaari ah. Waxaan si buuxda ugu sharaxay eedaysanaha xuquuqdiisa dastuuriga ah, waxaan aaminsanahay inuu fahmay.
3. **"DEMBI QIRASHADA"** sida uu soo bandhigay eedaysanuhu waa mid waafaqsan talladayda aan siiyay isaga/ iyada, waxaan u soo jeedinayaa Maxkamadda in la aqbal qirasha(diisa/deeda).

Waxaan ku saxeexay maxkamadda horteeda isagoo uu ila joogo eedaysanuhu \_\_\_\_\_ maalintan \_\_\_\_\_, 2 \_\_\_\_.

\_\_\_\_\_  
**Qareenka Eedaysana**